Northwest Justice Project

9940EN – Maxkamadda Sheegashooyinka Yaryar ee Gobalka Washington
Small Claims Court in Washington State (Somali)

Mey 2013

Shaxanka Tusmooyinka: 1

Qaybta 1: Hordhac 1

A. Waa maxay Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar? 1

B. Kawaran hadaanan Ingiriiska aqoon? 1

Qaybta 2: Sideen u Gayni Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar? 3

A. Doodo noocee ah ayan u diyaarsan karaa maxkamadda sheegashooyinka yaryar? 3

B. Waxaan haystaa kharashaad. Maan ku dari karaa lacagta aan u dacwoonayo? 4

C. Wakhti intee ah ban haystaa inaan keeno kiis maxkamadda sheegashooyinka yaryar? ... 4

D. Man ka dacwayn karaa dawladda maxkamadda sheegashooyinka yaryar? 4

E. Waxaan ka dacwoonayaa ganacsi. Ka waran hadaan isku dayo in kiiska loo rogo maxkamadda sheegashooyinka yaryar? 4

F. Ma inaan isku dayaa inaan xalliyo kiiskayga ka hor dacwadda? 5

G. Sideen ugu xallin karaa dibadda maxkamadda? 5

H. Ka waran haddii aan heshiis la galo eedaysanaha ka hor dhagaysiga? 6

I. Ka waran haddii qofka aan rabo inaan dacweeyo ka maqanyahay gobalka? 7

J. Sideen u dacweyn? 7

1. Hel maxkamadda haboon. 7

2. Hel foomka Ogaysiiska Dacwadda yar 7

3. Buuxi foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar. 8

K. Sideen u wargalin eedaysanaha? 9

1. Shakhsi ma lagu geeyay foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar. 9

2. U dir foomka Ogaysiiska dacwadda Yar qofka kaa soo hor jeeda. 10

L. Wakhti intee ah ban haystaa inaan wargaliyo eedaysanaha? 10

M. Goormaan heli taariikda maxkamadaynta? 11

N. Sideen diyaar ugu noqon maxkamadaynta? 11

1. Aruuri cadaymaha. 11

2. La xidhiidh makhraatiyaal gacan ka gaysan kara kiiskaaga. 11

3. Daalacasho. 11

4. Tababar. 12

O. Ka waran hadaanan samayn karin wakhtiga maxkamadayntayda? 12

P. Maxay tahay inaan keeno maxkamadaynta? 12

Q. Maxan qaban markaan tago maxkamadaynta? 12

R. Maxaa dhacaya maxkamadaynta? 12

S. Maxaan dhahayaa maxkamadaynta? 13

1. Sharax faafaahinta kiiskaaga. 13
2. U diyaar noqo su'aalaha. 13
T. Eedaysanuhu ma hadlayaa? 13
U. Garsooruhu ma ku dhawaaqi doonaa haddii aan guulaystay? 14
V. Maxaa dhacaya haddii aan waayo maxkamadaynta? 14
W. Maxaa dhacaya haddii eedaysanuhu waayo maxkamadaynta? 14
X. Waan guulaystay. Sideen u qaadan? 14
Y. Maxaan qaban marka aan ka helo lacagta eedaysanaha? 15
Z. Waan guulaystay. Eedaysanuhu lacag ma bixin doono. Maxaan samayn karaa? 15
AA. Ka waran haddii eedaysanuhu uuna bixin karin? 16
BB. Waan guul daraystay.Ma racfaan ma qaadan karaa? 16
CC. Eedaysanuhu wuxuu ku guulaystay Kadaba sheegasho kadhan igu ah, asagoo dhahaya lacag baan ku leeyahay. Haddii aan racfaan qaato, ma inaan bixiyaa ayadoo maxkamaddu ogoshahay racfaankayga? 18
DD. Waan guulaystay. Eedaysanuhu wuu racfaan qaadanayaa. Wuxuu isku dayayaa inuu iga joojiyo dayn qaadidda ayadoo racfaanku meel fiican marayo. Maxaan samayn? 18
Qaybta 3:Haddii Qof Kugu Dacweeyo Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar 19
A. Sideen ku ogaan haddii qof i dacwaynayo? 19
B. Waxaan helay Ogaysiis ah foomka Dacwadda Yar. Maxaan samayn? 19
C. Ma inaan la xidhiidhaa dacwoodaha? 19
D. Ka waran haddii dacwoodaha iyo ani galno heshiis ka hor maxkamad aadidda? 20
E. Ka waran haddii aan helo foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar maalmo ka hor maxkamadaynta? 20
F. Ka waran haddii aan aaminsanahay dacwooduhu xaqiiqdii inuu yahay midka sameeyay waxyaabo khalad ah? 20
G. Sideen u keenaa Kadaba Sheegashada? 20
H. Sideen ugu diraa ama ugu geeyaa koobi ah Kadaba Sheegashada dacwoodaha? 21
I. Sideen diyaar ugu noqon maxkamadaynta? 21
J. Ma inaan cadeeyaa inaan waxba galabsan? 22
K. Ka waran haddii aanan samayn karin wakhtigayga maxakamadaynta? 22
L. Maxay tahay inaan keeno maxkamadaynta? 23
M. Maxaan sameeyaa marka aan u tago maxkamadaynta? 23
N. Maxaa dhacaya maxkamadaynta? 23
O. Maxaa dhacaya marka kiiskayga la waco? 23
P. Maxaan dhahayaa marka ay tahay toogadayda inaan hadlo? 23
Q. Garsooruhu ma shaacin doonaa go'aanka? 24

R. Waan guuldaraystay. Hadda maxaa? 24
S. Waan guuldaraystay. Racfaan ma qaadan karaa? 25
T. Waan racfaan qaadanayaa. Ma ka joojin karaa dacwoodaha isku dayidda inuu wax qaato anigoo racfaan qaadanaya?.....26
U. Maan heli karaa kaalmo sharci oo dheeri ah?.....26

__RefHeading__3337_1344532108

_Toc356459876

Qoraalkan wuxuu bixyaa xog guud oo khusaysa xuquuqdaada iyo waajibaadka. Looguma talo galin wax dheeri ah ee talo siin sharci oo gaar ah.
Xogtan wakhtigeeda xaadirka ah waa, May 2013.

© 2013 Mashruuca Cadaaladda ee Waqooyi-galbeed (Northwest Justice Project) — 1-888-201-1014
(Ogolaanshaha koobiyenta iyo qaybinta waxaa la siiyay Ururka Cadaalada Siman (Alliance for Equal Justice) iyo shakhsiyaadka ee waxyaabaha aan ganacsiga ahayn oo kali ah.)

Qaybta 1: Hordhac

A. Waa maxay Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar?

Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar waa waaxda maxkamadda dagmo. Waxay noqon dhakhso, qaab raqiis ah in la xaliyo is qabsiga lacagta ood awoodi waydeen inaad idinku xalisaan.

Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar, waxaad dacwayn kartaa qof kale, ganacsi, ama -- mararka qaar – dawladda lacagta dhan ilaa $5,000. Qareennadu sida caadiga ah kama qayb qaadan karaan. Ma jiraan garsoor, mooshinno, ama ka hor imaadyo. Qofka dacwoonaya oo kali ah ayaa bixiya lacag yar oo ah keenidda dacwadda. Waxaad heli kartaa maxkamadayn ka dhakhso badan maxkamadaha kale. Maxkamdaynta badankeed way gaabantahay, waa ilaa 20 daqiiqo. Waa inaad sugtid marka maxkamaddu dhagaysanayso kiisaska kale.

- ◈ Maxkamadda sheegashooyinka yaryar waa inay u fududaato qof kasta inuu isticmaalo.

Aadidda maxkamad kasta waxay kaa dhigi kartaa mid xanaaq badan. Qoraalkan waa inuu kaa caawiyo inaad baratid sharciga khuseeya Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar.

Qaybta 2 waxay sharaxdaa sida loo bilaabo dacwad ee Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar. **Qaybta 3** waxay sharaxdaa waxa la samayn haddii qof Kugu dacweeyo Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar.

Qofka dacwoonaya (bilaabaya dacwadda) waa “dacwoode.” Qofka aad dacwaynaysid waa “eedaysane.” **Akhri labada qayboodba, mushkilad ma leh qaybta aad tahay**.

Nidaamyada Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar way ku kala duwanyihiin dagmo. Waxaa jiri kara waxyaabo qoraalkan aan si sax u khusaynin maxkamaddaada deegaan. Sidoo kale lacagaha la bixinayo way kala duwantahay. La xidhiidh xafiis-hayahaaga maxakamadda deegaan. Hel koobi ah nidaamyadeeda.

- ◈ Dagmooyin dhawr ah waxay leeyihiin muuqaal daawasho tusiya sida loogu diyaar garoobo loona soo dhigo kiiska maxkamadda sheegashooyinka yaryar. Waydii xafiis-hayaha maxakamadda haddii muuqaal daawasho la heli karo.

B. Kawaran hadaanan Ingiriiska aqoon?

Haddii aadan Ingiriis ku hadal, ama haddii aad qabtid caqabado hadalka ama dhagaysiga ah, codso turjumaan maxkamadda. **Dhawr** Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar waxay bixiyaan turjumaanno. Haddii aad tahay dacwoodaha (midka bilaaba dacwadda), codso turjumaan marka aad keentid dacwaddaada. Haddii aad tahay eedaysane (midka la dacweeyay), codso turjumaan marka aad keentid jawaabtaada ee dacwadda. Maxkamaddu waxay bixin kartaa mid

lacag la’aan ah. Waxaad u muujin kartaa in aadan heli karin mid. Marka aad u aadid maxkamadda maxkamadayntaada oo garsooruhu waco kiiskaaga, dheh mar kale inaad u baahantahay turjumaan.

◈ Dadka aan u dhalan U.S. way adeegsan karaan maxkamadda.

Turjumaankaagu wuxuu kaa caawin:

- soo dhigidda kiiska dhankaaga ah
- fahmid waxa dadka kale dhahayaan

Faafahintu waa muhiim. Haddii aad filaysid turjumaanka inuuna turjumaynin waxa aad rabtid inaad sheegto, u sheeg garsooraha ama turjumaanka. U hadal si cad oo tartiib ah. U sheeg garsooraha ama turjumaanka haddii ay jirto wax aadan fahmaynin.

Qaybta 2: Sideen u Gayni Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar?

A. <u>Doodo noocee ah ayan u diyaarsan karaa maxkamadda sheegashooyinka yaryar?</u>

- **Doodaha la xidhiidha lacag, $5,000 ama ka yar**, ood ku leedahay qof, ganacsi, ama – mararka qaar – dawladda.

T

◈ **Tusaalayaal:**

Mulkiilaha gurigaaga diido inuu celiyo lacagtaada $1,000 dhigaalka.

Dariskaagu ayna bixin doonin $2,600 aad ku heshiiseen in loo aruuriyo kharashka darbi aad wadaagtaan oo u dhaxeeya daaradihiina.

Shooladdaada cusub $350 ma shaqaynayso. Iibiyaha kaa gaday diido inuu celiyo lacagtaada.

- **<u>Ma ahan</u> doodaha lacag ka badan $5,000**

Haddii aad doonaysid inaad u dacwootid lacag badan, aad maxkamad ka badalan ama tuur qaar dacwaddaada ah si aad oola ekayso xadidaadda $5,000. Uma kala qaybin kartid dacwad isku mid ah labo meelood oo kala duwan.

- **<u>Ma ahan</u> doodaha kuwaas ood ka dacwoonaysid in lagu sameeyo qof inuu sameeyo wax** -- sida inuu fuliyo hawl ama hanti soo celiyo.

◈ Tusaalayaal:

Haddii lagu eedeeyay, <u>uma</u> dacwayn kartid qofkii aad u shaqaynaysay inaad ka hesho inuu dib kuu shaqaaleeyo. (Waxaad ku dacwayn <u>kartaa</u> mushahaaraadka aan la bixin.)

<u>Uma</u> dacwoon kartid celinta gaadhi. (Waxaad u dacwoon <u>kartaa</u> lacagta qiimaha gaadhiga.)

<u>Kuma</u> dacwayn kartid mulkiilaha gurigaaga inuu sameeyo dayactirka suuliga. (Waxaad u dacwoon <u>kartaa</u> lacagta: kala duwanaanshaha u dhaxeeya waxa gurigaagu la qiimo yahay mid suuli fiican laga jaro lacagta qiimaha guri aan suuli fiican lahayn.)

B. Waxaan haystaa kharashaad. Maan ku dari karaa lacagta aan u dacwoonayo?

Haa, haddii ay si toos ah u dhalisay dhibaatadii hore. Tusaale: haddii qofka kale waxyeelay gaadhigaaga, waxaad ku dacwoon kartaa kharashka dayactirka **lagu daray** kharashka kirada gaadhi muddadii dayactirka. Waxaa ku jiri kara kharashaadka keenista dacwadda iyo dukumiintiyada sharci ee loo gaynayo qofka kaa soo hor jeeda. Guud ahaan, **kuma** dari kartid mushahaaraadka khasaaray ama kharashaadka socdaalka luga aadayo diyaar garawga dacwadda.

C. Wakhti intee ah ban haystaa inaan keeno kiis maxkamadda sheegashooyinka yaryar?

Sida caadiga ah waa inaad keentaa **labo ama saddex sano gudahood** ka dib marka ay dhibaatadu dhacday. Haddii dhibaatada laga sameeyo heshiis qoraal ah oo la jabiyo, waxaad haysataa **lix sano** inaad keento.

Keen dacwaddaada sida ugu dhakhso badan. Xasuusta makhraatiyaashu cusubtahay. Aad bay macquul u tahay inaad haysato caddaynta aad u baahantahay si aad u samaysid kiis xooggan maxkamadda.

D. Man ka dacwayn karaa dawladda maxkamadda sheegashooyinka yaryar?

Xaalado dhawr ah oo kali ah:

Gobal dawladeedka – Kama dacwoon kartid Gobalka Washington gabi ahaanba.

Qaybaha kale dawldda (tusaalayaal, magaalo ama dagmo) – sida caadiga ah waa inaad ka keentid “dacwad maamul” marka hore. La xidhiidh xafiis-hayaha qaybta dawladda aad rabtid inaad ka dacwooto. Waydii sida loo keeno dacwad maamul. Haddii qaybta dawladda diido dacwaddaada maamul ee kadhanka ku ah, ka qaado qoraal diidmo maxkamadda sheegashooyinka yaryar. U sheeg xafiis-hayaha inay diideen dacwaddaada maamul. Hadda waxaad dooni kartaa inaad keento maxkamadda sheegashooyinka yaryar.

E. Waxaan ka dacwoonayaa ganacsi. Ka waran hadaan isku dayo in kiiska loo rogo maxkamadda sheegashooyinka yaryar?

Ganacsiga ama shirkadaha ma qabsan karaan qareen u taagan maxkamadda sheegashooyinka yaryar. (Qolka dhagaysiga ee caadiga ah, ganacsigu wuxuu qabsan doonaa inuu u hadlo, laakiin adigu ma samayn doontid.) Ganacsigu wuxuu isku dayi karaa in loo raro kiiska qolka dhagaysiga ee caadiga ah

Haddii ay qorshaynayso in la sameeyo tan, ganacsigu waa inuu ku ogaysiisyo wakhtiga dhagaysi. Aad dhagaysiga. U sheeg garsooraha in aadan doonaynin in maxkamadaynta la raro. U sharrax in raridda kiiska ayna cadaalad ahayn sababtoo ah ma haysatid qareen.

F. Ma inaan isku dayaa inaan xalliyo kiiskayga ka hor dacwadda?

Haa. Tani waa arrin wanaagsan.

- **Aadidda xataa maxkamadda sheegashooyinka yaryar waxay noqon karaan wareer.** Xallinta dibadda maxkamada waxay kuu baajin wakhti, lacag, iyo wareer.
- **Waxaad waayi kartaa** maxkamadda. Qofka kaa soo horjeeda wuxuu heli doonaa fursad inuu ka jawaabo dacwaddaada. Garsooruhu wuxuu yeeli karaa qofka kaa soo hor jeeda. Qofkaaga kaa soo hor jeeda xataa wuxuuu keeni karaa dacwad kadhan kugu ah ("Kadaba Sheegasho"), waydiinta inaad lacag bixiso.
- Xataa haddii aad guulaysatid, **ma awoodi kartid inaad qaadatid** lacagtaada. Waa inaad qabsatid qareen ama hay'ad dayn qaadid si ay kuugu qaadaan lacagta. Haddii qofka kaa soo hor jeeda leeyay lacag yar ama uuna lahayn, ma awoodi doontid inaad qaadatid.

G. Sideen ugu xallin karaa dibadda maxkamadda?

1) La xidhiidh qaybta kale laftirkaagu. Isku day in la gaadho heshiis. Samee wada hadal.

2) Hel qof inuu noqdo "dhexdhaxaadiye," qaybta saddexaad ee dhexdhexaadinta kuwaaso caawiya xallinta adiga iyo qofka kaa soo hor jeeda. Xarumaha xallinta muranada heer deegaan badanaa waxay leeyihiin dhexdhexaadiyaal lacag la'aan ah. Xafiiska Guud ee Qareenka Gobalka Washington ama Xafiiska Ganacsiga Wanaagsan ee deegaan ayaa kaa caawin kara dhexdhexaadin.

3) Qor oo dir "warqadda dalbashada" haddii aadan habayn inaad la hadasho qofka kaa soo hor jeeda. Warqadda, u sheeg qofka kaa soo hor jeeda wax ay dhibaatadu tahay. U sharrax sida aad doonaysid inaad u xaliso. Sheeg inaad qorshaynayso inaad soo dhigayso maxkamadda sheegashooyinka yaryar haddii aadan heshiis galin. Warqad dalbasho oo si wanaagsan u qoran ayaa tusin kartaa qofka kaa soo hor jeeda inaad darantahay. Sidoo kale waxay siin qofka kale ama ganacsiga fursad in dib looga fakaro. Warqadda dalbasho oo tusaale ah waxay ku taal dhamaadka qoraalkan.

Qoridda warqad dalbasho:

- Qor warqadda.
- Edab yeelo. Adeegsashada cay kuma caawin doonto.
- Qor dhibaatada oo kooban. Edeegso faafahin fiican si ay u cadaato. Ay ku jiraan magacyada iyo taariikhaha loo baahanyahay.
- Ku lifaaq xaqiiqada. Sheeg oo kali ah waxa xidhiidh ay la leedahay dhibaatada.
- Si cad u sheeg waxa aad ka rabtid qayb kaa soo hor jeedda inay sameeyaan: bixiyaan dayactirka, celiyaan lacagta dhigaalka, iyo wixii la mid ah.

- Sheeg sababta qaybta kaa soo hor jeedda ay u samayn wax aad rabtid. Haddii aad ogtahay waxa sharcigu ka qabo, tix raac. Haddii aadan haysan qoraal sharci, u sharrax sababta aad u soo dhigaysid inay wanaagsantahay.
- U sharax waxa aad samayn doontid haddii qaybta kale ayna waafaqin dalbashadaada. U sheeg waxa aad rabtid uun. Ha samayn hanjabaad. Tusaale: "waxaan aaminsanahay waxa aan codsanyo inuu yahay cadaalad. Waxaan rajayn inaad aqoonsan doontid tan. Haddii aadan samayn (buuxi meesha banaan), diyaar ayaan u ahay inaan keeno dacwad kadhan kugu ah maxkamadda sheegashooyinka yaryar."
- Dhamee warqadda adoo waydiinaya qofka kaa soo hor jeeda inuu kuu soo jawaabo, doorbid qoraal. Waydii qofka kaa soo hor jeeda inuu kuu soo jawaabo sida ugu dhakhso badan sidaa darteed labadiinaba waxaad xallin kartaan arrinta waxaadna dhigi kartaan gadaashiina.
- Daabac oo ku saxiix magacaaga salka hoose.
- Hayso koobi warqaddaada iyo jawaab kasta aad ka heshay dhanka kale.

◈ **Haddii aad ku guuldaraysataan inaad xalisaan dibadda maxkamadda, keen warqad dalbasho.** Waxay u muujin garsooraha in aad isku dayday inaad gaadhaan heshiis dacwadda ka hor.

4) Haddii shil gaadhi la xidhiidho, waxaad awoodi kartaa inaad ka hesho qaybta kale in lagu xalliyo dibadda maxkamadda haddii darawalka kale uuna caymis ku jirin oo uuna ku siinaynin khasaaraha. Haddii ay tahay in la hubo in shakhsiga kale inuu khaldanaa, waxaad bilaabi kartaa nidaam oo maamulku kaga joojinayo qofka laysinkiisa darawalnimo. Shakhsiga kale wuxuu ogolaan karaa inuu lacag ku siiyo si looga hortago taas. Si loo adeegsado nidaamkan:

- Buuxi warbixinta shilka. Qor qoraal koobaya khasaaraha.
- U dir kuwaan Waaxda Laysinka ee Washington (Wshington Department of Licensing) ee Olympia 180 cisho gudahood ee shilka.
- Haddii shakhsiga kale ogolaado inuu lacag ku siiyo, saxiix foom kaasoo ka noqda joojinta laysinka.

◈ **Ka daxadar adeegsiga nidaamkan.** Waxay horseedi kartaa joojinta laysinka ee darawal **kasta** oon caymis ku jirin kaasoo xataa laga yaabo qayb ahaan masuul ka ahaa shilka. Haddii aadan caymis ku jirin, waxay joojin karaan laysinkaaga, sidoo kale. La hadal qareen ka hor adeegsiga nidaamkan.

H. Ka waran haddii aan heshiis la galo eedaysanaha ka hor dhagaysiga?

Raac tilaabooyinkan:

- U diyaari heshiis qoraal ah qofka kaa soo hor jeeda.
- U gee koobi ah heshiiskan xafiis-hayaha maxkamadda. U sheeg xafiis-hayaha inuu diido kiiskan.
- Haddii qofka kaa soo horjeeda ogolaado inuu lacag bixiyo mar danbe, ka codso maxkamadda qoraal "sii-wadasho" (dib dhig). Oogu dir Ogaysiiska Sii-wadashada shakhsiga kale dirid shaabadaysan ama qof ahaan. Fiiri qaybta hoose la dhaho "Sideen u ogaysiiyo qofka iga soo horjeeda?"
- Haddii qofka kaa soo horjeeda lacag bixiyo ka hor wakhtiga dhagaysashada cusub ee ku muujisan Ogaysiiska Sii-wadashada, aad maxkamadda. U sheeg xafiis-hayaha inuu diido kiiska. Haddii aad diido, maxkamaddu kuuma soo celin doonto lacagta keenidda iyo kharashka adeegga. Waxaad ku dari kartaa kharashaadkan heshiiska xallinta.

I. Ka waran haddii qofka aan rabo inaan dacweeyo ka maqanyahay gobalka?

Haddii qofka aad dacwaynaysid yahay xaqlaha ama mulkiilaha kaaso ku nool gobal kale, waxaad ka dacwayn kartaa maxkamadda sheegashooyinka yaryar. RCW 3.66.100.

J. Sideen u dacweyn?

1. Hel maxkamadda haboon.

Aad maxkamadda dagmo ee dagmada meesha uu qofka kaa soo hor jeeda ku noolyahay ama meesha ganacsiga aad dacwaynaysid ka sameeyo ganacsi. Goobaha maxkamadda dagmo waa boggaga baluugga ah ee bogga taleefoonkaaga hortiisa ama onlaynka: http://www.courts.wa.gov/court_dir. Maxkamadda sheegashooyinka yarayar waa waaxda maxkamadda dagmada. Xafiis-hayaha maxkamadda dagmada wuxuu kuu sheegi karaa haddii ciwaan gaar ah uu yahay meelaha maxkamadda iyo inkale.

Haddii aadan heli karin ciwaanka qofka kaa soo hor jeeda dadaal badan ka dib, waxaad dacwad gayni kartaa dagmada meeshaas oo qofka kaa soo hor jeeda ka shaqeeyo, adeegsiga ciwaankaas.[1]

Haddii aad dacwad ka gaynaysid shil gaadhi ama jeeg khaldan, waxaad dacwad gayni kartaa dagmada meesha shilku ama dhacdada jeegga khaldan ka dhacay.[2]

2. Hel foomka Ogaysiiska Dacwadda yar.

Ka codso xafiis-hayaha maxkamadda foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar.Waxaad awooddaa inaad ka codsato xafiis-hayaha maxkamadda inuu kuu soo diro foomka madhan ee Ogaysiiska Dacwadda Yar Haddii ay saas tahay, waxaad buuxin foomka, oo ansixin, waxaadna dib ugu soo

1 RCW 3.66.040

2 RCW 3.66.040(4), RCW 4.12.025(2)

diri maxkamadda. Haddii kale, waa inaad saxiixdaa foomka oo buuxsan horta xafiis-hayaha maxkamadda ood ku keentid foomka shakhsi ahaan. Waydii xafiis-hayaha maxkamadda deegaankaaga waxa ay nidaamkoodu yahay. Xafiis-hayaha maxakamaddu wuxuu kuu sharraxi karaa nidaamyada haboon wuxuuna ku siin foomamka muhiimka ah.

Xafiis hayuhu ma karo:

- inuu foomamka kuu buuxiyo
- inuu ku siiyo talo sharci
- inuu isku dayo saadaalinta sida garsooruhu u xukumi karo

◈ Waxaad ka heli kartaa foomamka maxkamadda sheegashooyinka yaryar wabsaydka Maxkamadaha Gobalka Washington ee www.courts.wa.gov/forms. **Ha adeegsan foomamkan ilaa aad ka hubinaysid maxkamadda sheegashooyinka yaryar ee deegaankaaga.** Dagmooyin dhawr ah waxay u baahan foomam gaar ah.

3. Buuxi foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar.

Foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar waa meel banaan in lagu qoro "dacwoodaha" iyo "eedaysanaha" ee kiiska. Ku qor magacaaga meesha banaan ee "dacwoodaha." (Dacwooduhu waa midka keena dacwadda.) Ku qor magaca qofka ama ganacsiga aad ka dacwoonayso meesha banaan ee "eedaysanaha." (Eedaysanuhu waa midka aad ka dacwoonaysid.)

Qor ciwaankaaga iyo ciwaanka eedaysanaha meesha banaan ee magaciina ka hoosaysa. Waa inaad ku qortaa ciwaanka waddo ee eedaysanaha. Lambarka P.O Box kuma filna. Ha ku jiro taleefoon lambarka haddii uu jiro.

Waxaad ka dacwoon kartaa in kabadan hal qof, qor magaca iyo ciwaanka qof kasta. Haddii aad ka dacwoonaysid qof guursaday, ku magacaw xaaska iyo ninka labadaba dacwadda. Haddii aad ka dacwoonaysid natiijo uu keenay shil gaadhi, ku magacaw darawalka iyo qofka ku qoran gaadhiga labadaba. Haddii dacwaddaadu ku saabsantahay dood ganacsi, ku magacaw ganacsiga, mulkiilaha ganacsi, iyo shaqaale kasta oo ku lug leh ganacsiga.

◈ **Haddii aad ku magacawdo qof(dad) khaldan ama ganacsi dacwaddaada,** garsooruhu wuxuu diidi doonaa kiiska kadhanka ku ah eedaysanayaashaas. Waxaad mar danbe dib u keeni kartaa dacwadda kadhanka ku ah eedaysanayaasha saxda ah, haddii uun aad ku keento wakhtiga.

Haddii aad ka dacwoonaysid iskaashato, waa inaad haysid magaceeda oo saxan. Qor ciwaanka xafiiska iskaashatada ama ciwaanka "wakiil sharci ah." [3]A "wakiil sharci ah" waa qofka ama shirkadda ay tahay inaad ogaysiisid in aad dacwaynaysid iskaashatada. Xog dheeri ah, fiiri "Sideen u wargalin eedaysanaha?" ee xagga hoose.

[3] RCW 4.28.080

Dhamaan iskaashatooyinka ganacsiga ka sameeya Gobalka Washington waa inay ka diiwaan gashanyihiin magacyada iyo ciwaanada hay'adahooda Xoghayaha Gobalka Washington (Washington Secretary of State.[4]) Si loo helo magaca iyo ciwaanka iskaashato iyo wakiil sharci ah, wac Xoghayaha Gobalka Washington (Washington Secretary of State) ee (360)753-7115. Waxad waliba booqan kartaa wabsaydka (http://www.secstate.wa.gov/ ee Iskaashatooyinka). Iskaashato ka samaysa ganacsi Gobalka Washington taasoo aan ku guulaysan inay iska diiwaan galiso hay'ad waxaa siin kara Xoghaya Gobalka (Secretary of State.[5])

Foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar waxay leedahay meel banaan in lagu qoro, si gooban, waxa dacwaddaadu ku saabsantahay iyo cadadka lacagta aad u dacwoonaysid.

◈ Sug inaad saxiixdo foomka ilaa aad ka siinayso xafiis-hayaha maxkamadda. Dagmooyin dhawr ah, xafiis-hayuhu waa inuu ku fiirinayo saxiixidda.

Ka dib marka aad buuxiso foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar, qaad tilaabooyinkan soo socda:

1. Hel ugu yaraan labo koobiyada foomka buuxsan. Samayso ama ka hel xafiis-hayaha.
2. Sii foomka orjinaalka xafiis-hayaha maxkamadda.
3. Sii xafiis-hayaha lacag yar in la keeno dacwadda ($14 – $29).
4. Saxiix foomka horta xafiis-hayaha (haddii dagmadaada looga baahanyahay).
5. Dir koobiga foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar ama shakhsi ahaan ugu gee qofka kaa soo hor jeeda. Fiiri "Sideen u wargalin eedaysanaha?" ee xagga hoose.

K. Sideen u wargalin eedaysanaha?

Waa inaad ogaysiisaa eedaysanaha in aad bilawday dacwad adoo u gaynaya asaga/ayada Ogaysiiska Dacwadda Yar. (waxaan ugu yaadhnaa tan "adeegga dacwadda.") Waxaad u diri kartaa foomka eedaysanaha ama waxaad ugu gayn kartaa foomka shakhsi ahaan.

Foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar waa in loo geeyaa eedaysanaha ama qofka wayn ee si rasmi ah ula nool asaga/ayada. Haddii aad dacwaynaysid ganacsi, iskaashato, hay'ad dawladeed, ama mulkiile maqan, waa inaad u gaysid foomka "wakiil sharci ah" ama "wakiil maamul," sida xoghaye ama maareeyaha kiro. [6]

1. Shakhsi ma lagu geeyay foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar.

◈ Ma gayn kartid foomka laftirkaagu.

- Gee foomka xafiiska sheriifka ama qabso khabiir "waraaqo geeye." Ka fiiri diiwaanka shirkadaha waraaqo geeye khabiir ah. Lacagta ujuurada badanaa waa $15 ilaa $30.

4 RCW 23B.05.010
5 RCW 23B.05.040(2)
6 Fiiri RCW 4.28.080, *wakiil adeegaya iyo* RCW 23B.05.040(2), *wakiil sharci ah*

- Waxaad yeelan kartaa saaxiib ka wayn 18 jir geeya foomka – haddii uun saaxiibku uuna ahayn makhraati oo sinaba shakhsi ahaan ugu lug lahayn kiiska.
- Qofka gaynaya foomka **waa inuu** helaa saxiixa eedaysanaha Adeegga caddaynta marka waraaqaha lagaynayo. Haddii eedaysanuhu joogin guriga, qof wayn oo la nool asaga/ayada (tusaale: xaas/ninka, qof la dagan) ayaa sidoo kale saxiixi kara foomka Adeegga caddaynta. Haddii aad dacwaynaysid ganacsi, iskaashato, hay'ad dawaladeed, ama mulkiile maqan, oo leh "wakiil sharci ah" ama "wakiil maamul" (sida maareeyaha kiro) saxiixi foomka Adeegga caddaynta. Ka samee koobi foomka madhan ee Adeegga caddaynta ee qoraalkan.
- Waa inaad sidoo kale haysaa qofka kaasoo geeya foomka warqadda dhaarta maxkamadda oo sheegaysa in foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar la geeyay. Waa inay ku saxiixaan warqadda dhaarta horta ansixiyaha waraaqaha.
- Ka dib marka foomka Ogaysiiska Dacwadda yar la geeyo oo Adeegga caddaynta la saxiixo (ama warqadda dhaarta la saxiixo), hubi in Adeegga caddaynta (ama warqadda dhaarta) loo keenay xafiis-hayaha ee maxkamadda.
- Waa inaad haysatid foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar uu keenay xafiiska shariifka ama waraaqo geeye khabiir ah si loo yareeyo fursadaha khaldamidda. Haddii aad khalad sameysid, waxay dib ridi kartaa kiiskaaga. Garsooruhu xataa wuxuu diidi karaa kiiskaaga.

AMA

2. U dir foomka Ogaysiiska dacwadda Yar qofka kaa soo hor jeeda.

- Ku dir foomka xafiiska boostada. Codso Dirid Diiwaan-gashan ama Dirid Shaabadaysan. Codso Jawaab Soo-celinta. Taasoo micnaheedu yahay eedaysanuhu waa inuu saxiixaa helidda marka ay/uu helo foomka diridda. Waxay/wuxuu dib kuugu soo diri foomka adiga.
- Marka aad ka heshid Jawaab Soo-celinta oo leh saxiixa eedaysanaha (ama qof kaasoo la nool eedaysanaha, ama saxiixa "wakiil sharci" ama "wakiil maamul"), koobi ka samee. U qaado koobiga xafiis-hayaha maxkamadda. Xafid warqadda orjinaalka ah. Keen maxkamadayntaada.

L. Wakhti intee ah ban haystaa inaan wargaliyo eedaysanaha?

Foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar waa inay ku soo gaadho eedaysanaha ugu yaraan **toban cisho** ka hor wakhtiga maxkamadda. Haddii aad u diraysid foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar eedaysanaha, ku dir ugu yaraan **13 cisho** ka hor wakhtiga maxkamadda. Haddii aadan waafaqin wakhtigan kama danbaysta ah, ku laabo xafiis-hayaha. Hel Foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar oo kale. Waa in lagu keeno wakhtiga loo qabtay.

M. Goormaan heli taariikda maxkamadaynta?

Waa inaad heshaa marka aad u gaysid foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar xafiis-hayaha maxkamadda.

N. Sideen diyaar ugu noqon maxkamadaynta?

1. Aruuri cadaymaha.

- Hel warqaaha iyo dukumiintiyada muhiimka ah eed u baahantahay si aad u cadaysid kiiskaaga. Tusaale: heshiis, rasiidka iibinta, sawir (oo ah alaab ciladaysan, burbur guri, waxyeelo shil gaadhi, iyo wixii la mid ah) shaxan, sawir, heshiiska kiraystaha ama ijaarka, jeegga la qaadicay, biilasha dayactirka ama qoraal qiyaasta khasaare. Marka aad maxkamadda joogtid, qof shakhsi ahaan ku xeel dheer caddaynta waa inuu qeexaa oo uu sharaxaa waxa ay tahay.

  Keen cadayn kasta aad u baahan kartid inaad isku difaacdo lacala haddii uu eedaysanuhu keeno "Kadaba Sheegasho" kadhan kugu ah. (Kadaba Sheegashadu waxay sheegi kartaa in eedaysanuhu uuna lacag kugu lahayn sababtoo ah waa khaladkaaga. Waxay sheegi kartaa in kugu leeyahay eedaysanuhu lacag.)

- Haddii aad haysatay hanti lagaa qaatay ama wax la yeelay, qor qiimaha ay ka joogto dukaamada kala duwan in la magdhabo.

- Keen orjinaalada, hadduu ay suuro gal tahay. Keen koobi dheeri ah lacala haddii maxkamaddu doonto inay haysato wax kaste oo dukumiintiyadaada ah. Haddii kiiskaagu ku lug yeesho waxyaabo khaldan, keen maxkamadda haddii ay suuro gal tahay.

- **Waxaad kali ah ood cadayn soo gudbin kartaa muddada maxkamadda, ma ahan dib**. Haddii aadan hubin in aad u baahan doonto wax cadayn ahaan, keen si kastaba.

2. La xidhiidh makhraatiyaal gacan ka gaysan kara kiiskaaga.

Ka codso inay joogaan maxkamaddaada. Washington dhexdeeda, ma dalban kartid ("wicidda maxkamad") makhraati imaada maxkamadda sheegashooyinka yaryar.

Makhraatiyadaadu waa inay aqoon u leeyihiin xaqiiqda ay cadaynayaan. Makhraatigu waa inuu arkay ama maqlay waxyeelada, shilka, ama dagaalka **shakhsi ahaan.** Qoraalo makhraati oo wanaagsan waxay gacab ka gaysan in kabadan cadayn qoraal.

3. Daalacasho.

Haddii aad doonaysid inaad aragto sida maxkamadda sheegashooyinka yaryar u shaqayso, waydii xafiis-hayaha maxkamadda marka ay maxkamaddu qabato maxkamadaynta sheegashooyinka yaryar. Daawo maxkamadaynta laftirkaagu si aad u aragtid waxa dhacaya ee sheegashooyinka kale iyo sida garsooruhu u xukumayo. Haddii ay maxkamaddaadu leedahay muuqaal daawasho oo ku saabsan maxkamadda sheegashooyinka yaryar, waydiiso xafiis-hayaha muuqaal daawasho.

4. Tababar.

Ku taba-baro soo dhigidda kiiskaaga. Hubi soo bandhigiddaada in la maamulay oo la soo koobay. Isku day inaad qortid liiska qodobada muhiimka ah eed doonaysid inaad xasuusnaato. Ay ku jiraan su'aalaha eedaysanaha iyo makhraatigaaga. Horay ha u ogaado makhraatigaagu su'aalaha aad waydiin doontid.

O. Ka waran hadaanan samayn karin wakhtiga maxkamadayntayda?

Sii garsooraha qoraal aad ku codsanaysid "sii-wadasho" (dib dhig). Ugu yaraan la xidhiidh xafiis-hayaha maxkamadda. Haddii aad waydid maxkamadaynta la'aanta xidhiidhka koobaad ee maxkamadda, waxaad waayi doontaa kiiskaaga si ula kac ah. Garsooruhu wuxuu diidi karaa kiiska, ama waxaad u waayi kartaa baaqitaanka.

P. Maxay tahay inaan keeno maxkamadaynta?

- Dhamaan cadaymahaaga, ooy ku jiraan dukumiintiyo qoraal ah iyo caddaynta muqaalka.
- Orjinaalka Adeegga caddaynta ama Jawaab Celinta xafiiska boostada. Waraaqahaan waa inay leeyihiin saxiixa qofka kaa soo hor jeeda (ama xaas/ninka, qof la dagan, "wakiil sharci ah,"ama "wakiil maamul").
- Makhraatiyadaada.

Q. Maxan qaban markaan tago maxkamadaynta?

Iska xaadiri xafiis-hayaha maxkamadda marka aad u timaadid maxkamadda maxkamadayntaada. Xafiis-hayuhu wuxuu kuu sheegi doonaa qolka maxkamadda aad tagaysid. Waxaad heli doontaa liiska kiisaska maxkamaddu dhagaysan doonto maalintaas lagu dhajiyay dibadda qolka dhagaysiga maxkamadda. Waxaad dhagaysan kartaa liiska kor loo yeedhinayo kulanka bilawgiisa. Haddii aadan ka arag liiska kiisaska ama aadan ka maqlin yeedhinta, la kulan xafiis-hayaha maxkamadda.

R. Maxaa dhacaya maxkamadaynta?

Garsooruhu wuxuu u yeedhi doonaa "dacwoodaha" (qofka keenay kiiska). Garsooruhu wuxuu u yeedhi doonaa qofka ka soo hor jeeda "eedaysanaha" (sababtoo ah waxay/wuxuu ka "dafaacayaa" naftiisa/nafteeda adiga).

Garsooruhu sida caadiga ah wuxuu bilaabi asagoo sharaxaya nidaamka maxkamadda. Badanaa wakhtigan dhamaan dacwoodayaasha, eedaysanayaasha iyo makhraatiyaasha waa inay ku dhaartaan inay sheegaan runta. Ka dib maxkamaddu waxay u wici kiiska koobaad. Sug garsooruhu inuu ku dhawaaqo kiiskaaga. Ka dib soo dhig cadaymahaaga iyo makhraatiyadaada.

S. Maxaan dhahayaa maxkamadaynta?

Waa inaad ku cadaysid eedaysanaha aad ku leedahay lacagta. Eedaysanuhu waa inayna cadaynin in ay/aadan ku lahayn lacag.

Haddii aadan haysan cadayn kugu filan – haddii garsooruhu helo oo kali ah odhaahdaada kadhanka ku ah odhaahda eedaysanaha taasoo ah in la sameeyo go'aan – waad waayi kartaa. Ha fududayn kiiskaaga.

1. Sharax faafaahinta kiiskaaga.

- Qeex waxa dhacay.
- Tus garsooraha dhamaan cadaymaha aad la timid.
- Sharax sababta aad u aaminsantahay in lagu leeyahay eedaysanaha cadadka eed u dacwoonaysid.
- Sharax in aad ugu gaysay Ogaysiiska Dacwadda Yar eedaysanaha wakhtiga. Tus garsooraha Adeegga caddaynta si loo cadeeyo.
- Haddii aad haysatid makhraatiyaal, u sheeg garsooraha inaad jeclaan lahayd inay makhraatiyadaadu ku marag kacaan. Garsooruhu wuxuu kuu sheegi doonaa in aad su'aali karto makhraatiyadaada. Waydii su'aalaha aad ka diyaarisay wixii ay arkeen am ay maqleen iyo sababta aad ugu saxantahay kiiskan.

2. U diyaar noqo su'aalaha.

Ka dib garsooraha, iyo eedaysanaha, waxay wax kaa waydiin karaan su'aalaha makhraatiyadaada. Si daxadar leh uga jawaab su'aalaha. Ha caayin dadka kale. Isku day inaad noqotid mid dareen badan.

T. Eedaysanuhu ma hadlayaa?

Haa. Ka dib marka garsooruhu dhameeyo su'aalaha adiga iyo makhraatiyadaada, garsooruhu wuxuu waydiin doonaa eedaysanaha inuu u soo dhigo dhanka kale waxa uu hayo. **Ha dhabqin.**

Eedaysanuhu wuxuu soo dhigi karaa **"Kadaba Sheegasho."** "Kadaba Sheegasho" waa dacwada uu keeno eedaysanuhu oo kadhan kugu ah ka dib helidda Ogaysiiskaaga Dacwadda Yar. Kadaba Sheegasho waxay sheegi kartaa eedaysanaha inaadan lacag ku lahayn, sababtoo ah wax ayaad khaladay. Waxay sidoo kale sheegi kartaa in eedaysanuhu wax kugu leeyahay.

Haddii eedaysanuhu keenay Kadaba Sheegasho, wuxuu garsooruhu sidoo kale dhagaysan doonaa cadaymaha eedaysanaha ee ku saabsan dacwaddan. Waxaad heli doontaa fursad inaad ka difaacdo naftaada Kadaba Sheegashada eedaysanaha. Sug ilaa garsooruhu ka sheegayo inaad hadli kartid ka hor su'aalo waydiinta.

◈ Haddii eedaysanuhu keeno Kadaba Sheegasho kadhan kugu ah, balse aadan waligii helin ogaysiis ku saabsan ka hor maxkamadaynta. U sheeg garsooraha.

U. Garsooruhu ma ku dhawaaqi doonaa haddii aan guulaystay?

Ka dib dhagaysiga labada dhinac, garsooruhu wuxuu samayn karaa labo mid:

- ku dhawaaqid go'aanka si dhakhso leh ama
- u baahan wakhti dheeri ah in la baadho kiiska

Haddii garsooruhu u baahdo wakhti dheeri ah, ay/uu ku bixin doono go'aan qoraal ah dhawr asbuuc gudahood. Haddii garsooruhu go'aansado maxkamadda dhexdeeda maalintaas, oo labada dhinacba joogaan, adiga ama eedaysanaha waa inuu waydiiyo maxkamadda in la amro qorshe lacag bixin.

V. Maxaa dhacaya haddii aan waayo maxkamadaynta?

Haddii aadan haysan sabab wanaagsan oo ah waayidda maxkamadayntaada ood ku guuldaraysatid inaad ogaysiisid maxkamadda, waxaad u waayi doontaa si iskaa ah ("maqnaansho"). Garsooruhu wuxuu diidi doonaa kiiska. Ma heli kartid kiis dib loo balamiyo.

Haddii aad haysatid sabab wanaagsan oo ah waayidda maxkamadaynta, waxaad keeni kartaa Mooshin in la Qaadaco Xukunka. Keen Mooshin in la Qaadaco Xukunka sida ugu dhakhso badan ka dib xukunka maqnaansho. U gee xafiis-hayaha maxkamadda dagmada. Fiiri qoraalkanaga la dhaho *Mooshinka in la Qaadaco Xukum/Amar*, laga heli karo www.washingtonlawhelp.org. Isku day inaad ka codsato qareen caawin.

Haddii aad waydo maxkamadaynta oo eedaysanuhu keeno oo soo dhigo "Kadaba Sheegasho" (dacwad sheegaysa inaad wax khaladay ama lacag lagugu leeyahay) oo kadhan kugu ah, waxaad waayi doontaa Kadaba Sheegashada si iskaa ah, oo kale. Haddii Kadaba Sheegashada eedaysanaha sheegto inuu wax kugu leeyahay eedaysanuhu, garsooruhu wuxuu go'aamin karaa inaad siisid eedaysanaha.

W. Maxaa dhacaya haddii eedaysanuhu waayo maxkamadaynta?

Waxay/wuxuu waayi karaa si iskaa ah ("maqnaansho"). Waa inaad cadaysid in eedaysanaha loo geeyay Ogaysiiska Dacwadda Yar. Fiiri "Sideen u wargalin eedaysanaha?" ee xagga hoose. Ka dib garsooruhu wuxuu go'aansan karaa in eedaysanaha uu bixiyo waxa aad sheegatay oo la cadeeyay inay/inuu kaa qabo.

X. Waan guulaystay. Sideen u qaadan?

Maxkamaddu kuu qaadi mayso. Waxaad kala hadli kartaa eedaysanaha qorshe lacag bixin. Qaabka kuu wanaagsan in aad u qaadato lacagta waa eedaysanuhu inuu kuu qoro jeeg. Eedaysanuhu sidoo kale wuxuu ku bixin karaa cadaan. Sii eedaysanaha warqadda helidda oo leh saxiixaada haddii aad heshid lacag bixin cadaan ah.

Y. Maxaan qaban marka aan ka helo lacagta eedaysanaha?

Marka aad hesho dhamaan maxkamaddu waxa ay u sheegtay eedaysanaha inuu ku siiyo, ku ogaysii xafiis-hayaha maxkamadda dagmada qoraal in eedaysanuhu ku siiyay. Waxaad awoodi kartaa inaad samaysid tan adoo saxiixaya meesha haboon ee foomka Xukunka sheegashooyinka Yaryar. Ka dib gee foomka saxiixan maxkamadda.

Dagmooyinka kale waxay leeyihiin foom gaar ah oo laga helayo waaxda sheegashooyinka yaryar. Sida caadiga ah waxaa loogu yeedhaa foomka Qanaca Xukunka.

Z. Waan guulaystay. Eedaysanuhu lacag ma bixin doono. Maxaan samayn karaa?

Haddii qofka aad dacwaynaysid uu awoodo laakiin lacagta uuna bixin doonin, waxaad wali awoodaa inaad qaadato. Qaad tilaabooyinka hoose haddii ayna jirin racfaan oo eedaysanuhu uuna ku bixin xukunka **30 cisho gudahood** ee xukunka -- ama ayadoo la raacayo qorshaha lacag bixinta ay u qabatay maxkamaddu:

1. Waydii maxkamadda in la “cadeeyo” xukunka. Ka hel foomka si aad u samaysid tan xafiis-hayaha maxkamadda dagmada. (Waxaa jira lacag yar.)
2. Gee waraaqaha lacagta yar in la helo “ganaaxo” bangi akoontiga ama mushahaarka eedaysanaha. “Ganaaxidda” micnaheedu waa lacagtaas waxaa laga qaadi bangi akoonka ama mushahaarka eedaysanaha waxaana la siin adiga. Waxaad sidoo kale haysan kartaa hantideeda/diisa waana la iibin si loogu bixiyo daynta (waxaa loo yaqaan “dhaqan galin”).

   Waxaad u baahnaan kartaa inaad caawin ka heshid qareen. Ku dar kharash kaste oo qareenka ah iyo kharashka cadaynaya xukunka ee cadadka eedaysanuha laga filayo inuu ku siiyo. [7]
3. Waxaad dhigi kartaa “guri haysashada” ee hantida ma guurtada eedaysanaha:
   - Ka iibso warqadda foomka caddaynta xukunka xafiis-hayaha maxkamadda lacag yar (ilaa $5).
   - Gee warqadda maxakamadda sare lacag yar oo dheeri ah (ilaa $15). Gayntan waxay dhigtaa “guri haysashada” ee hantida ma guurtada ah oo eedaysanaha kasta ee maxkamadda sare ee dagmada.
   - Gee warqadda caddaynta xukunka dagmooyin badan oo aad filaysid in eedaysanuhu ku leeyahay hantida ma guurtada ah. Guri haysashada waxay samaysaa iibinta hantida ma guurtada ah. Guri haysashada waxay ahaataa hanti xataa ka dib marka la iibiyo. **Tan ma ahan damaanad in lagu siin doono lacagta.**

     Xukun la cadeeyay wuxuu u fiicanyahay toban sano. Waxaad awoodaa inaad qaadatid mar danbe. In badan ood sugtid, way ka adagtahay in la qaado. Marka

[7] RCW 6.17.110(2)

toban sano la dhaafo, waxaad heli kartaa cusboonaysiin xukun mar ka badan muddo toban sano ah.

4. Haddii dacwaddaadu ka kacday shil gaadhi oo eedaysanuhu uuna caymis ku jirin, waxaad ku cadaadin kartaa in ay/uu bixiyo. Haddii eedaysanuhu kugu siinin 30 cisho gudahood ee xukunka garsooraha, waxaad joojin kartaa laysinka eedaysanaha. Ka codso xafiis-hayaha maxkmadda koobiga caddaynta xukunka. Ka dib la xidhiidh Waaxda Laysinka ee Olympia.
5. Waxaad heli kartaa caawinta hay'adda dayn qaadidda lacagtaada. **Hay'addu badanaa waxay kuu kaydin doontaa kala badh waxa ay kuu soo qaaday.** Qareennada dayn qaadidda sidoo kale badanaa waxay soo dalacaan lacag badan qaadidda lacagtaada.

Haddii aadan aqoon hantida iyo mushahaarka uu eedaysanuhu haysto, waxaad ku samayn kartaa ayada/asaga inuu imaado maxkamadda mar kale. Waxaad waydiin kartaa akoontiyada bangi, hantida shakhsi iyo sidoo kale hantida ma guurtada ah. Waxaad u baahan doontaa caawinta qareen.

AA. Ka waran haddii eedaysanuhu uuna bixin karin?

Ma awoodid inaad ka qaadato gabi ahaanba. Alaabo dhawr ah iyo mushahaaraad lagama qaadan karo in lagu khasbo xukun. Haddii dhanka guul daraystay uuna lahayn alaabo badan ama lacag badan, waxay/wuxuu keeni karaa "Dacwadda Wax-dhaafidda" si looga hortago xoogaa yar oo qiimaha lahaansho. Cadadka waxaa ku jiri kara guri, saamaan, gaadhi, dhar iyo mushahaaro dhawr ah. Qoraalkanaga la dhaho *Xaquuqda Dayn Qaataha ee Dacwadda*, ee www.washingtonlawhelp.org, waxaa ku qoran xog dheeri ah.

BB. Waan guul daraystay.Ma racfaan ma qaadan karaa?

Haddii aad keentid dacwad laakiin aad waydid maxkamadaynta: haa, haddii ay sheegashadaadu ahayd $1,000 ama ka badan.

Haddii eedaysanuhu keeno "Kadaba Sheegasho" kadhan kugu ah (sheegaysa inay wax kaa khaldanyihiin ama lacag lugu leeyahay): haa, haddii ay ahayd $250 ama ka badan.

Haddii aad ka racfaan qaadato, maxkamadda sare (ma ahan maxkamadda sheegashooyinka yaryar) waxaa la tixgalin doonaa racfaankaaga. Maxkamadda sare waxay kali ah ooy fiirin doontaa diiwaan qoraal iyo caddaynta maxkamadayntaada hore ee maxkamadda sheegashooyinka yaryar.[8] Taasi micnaheedu waa, inay maxkamadda sare dhahdo sidaas mooyaane, ma keeni kartid cadayn cusub ama lama hadli kartid in lagu caawiyo dacwaddaada markale. Ma jiri doonaan gudi, ma jiraan qareenno, ama dacwado cusub, in maxkamadda sare u ogolaato mooyaane.

[8] RCW 12.36.055

Haddii aad doonaysid inaad racfaan qaadato, qaad tilaabooyinkan 30 cisho gudahood ee xukunka garsooraha ee ku aadan kiiskaaga:[9]

1. Ka hel foomka Ogaysiiska Racfaanka xafiis-hayaha maxkamadda dagmada. Buuxi. Ka samee ugu yaraan labo koobi. Gee orjinaalka Ogaysiiska racfaanka maxkamadda dagmada.
2. Ogaysii eedaysanaha in aad racfaan qaadanayso. Ha haysto koobiga Ogaysiiska Racfaanka loo geeyo (ama "la siiyo") eedaysanaha. Raac tilaabooyin isku mid ah eed qaaday si aad u ogaysiiso eedaysanaha ee dacwaddaadii hore si loo ogaysiiyo eedaysanaha racfaanka. Fiiri "Sideen u wargalin eedaysanaha?" ee xagga sare.
3. Haddii qof u geeyo koobiga Ogaysiiska Racfaanka eedaysanaha, gee Adeegga caddaynta (ama warqadda dhaarta) maxkamadda dagmada **30 cisho gudahood.** Haddii aad dirtay Ogaysiiska Racfaanka, keen Jawaab Celinta ee Dirid Shaabadaysan ama Dirid Diiwaan-gashan ah **30 cisho gudahood.**
4. Hel warqadda (diiwaan qoraal oo maxali ah) ee xukunka maxkamadda sheegashooyinka yaryar. Waa inaad bixisaa lacagta yar ee warqadda (badanaa waa ilaa $20).[10]
5. Ku dhaji caddaynta dayn bixinta maxkamadda dagmada. caddaynta dayn bixinta waa inay goob jog ka ahaadaan labo ama dad ka badan (qof hubiya in lacagta la bixin doono), ama shirkad wax hubisa (haddii maxkamaddu ogolaato), labo jeer cadadka xukunka lagu daray kharashka ama labo jeer cadadka dacwaddaada (wax kasta oo kabadan).[11] caddayntan dayn bixinta waxay bixisaa xukun kasta kadhan kugu ah haddii aad waydo racfaankaaga.[12]
6. Bixi lacagta gaynta ee racfaanka ee maxakamadda sare, badanaa waa $200**.** Waxaad ku bixin kartaa cadaan, warqadda lacagta ku qorantahay, ama jeegga lacag-hayaha – la siiyo Xafiis-hayaha Maxkamadda Sare. Haddii aad dhaqaalo yartahay, waydii xafiis-hayaha haddii lagaa "dhaafayo lacagta keenista," taasi waa, in aan la bixin lacagta sababtoo ah waad dhaqaalo yartahay. Sidoo kale waxaad bixin kartaa lacagta diyaarinta racfaanka ("lacagta geedi socodka diyaarinta racfaanka," ilaa $40).
7. Kama badna afar iyo toban cisho ka dib marka aad keento Ogaysiiska Racfaanka, xafiis-hayaha maxkamadda dagmada wuxuu keeni doonaa warqadda (diiwaanka qoraal maxsuul ah) ee kiiska sheegashooyinka yaryar ee maxkamadda sare.[13] Maxkamadda sare waxay siin doontaa kiiskaaga lambar cusub. Xafiis-hayaha maxkamadda dagmada wuxuu ku ogaysiin doonaa lambarka cusub. Ka dib markaa aad dhagaysatid xafiis-hayaha maxkamadda dagmada, la xidhiidh maxkamadda sare tilmaamo dheeri ah.

9 RCW 12.36.020
10 RCW 3.62.060
11 RCW 12.36.020(2)
12 RCW 12.36.090
13 RCW 12.36.050(1)

CC. Eedaysanuhu wuxuu ku guulaystay Kadaba sheegasho kadhan igu ah, asagoo dhahaya lacag baan ku leeyahay. Haddii aan racfaan qaato, ma inaan bixiyaa ayadoo maxkamaddu ogoshahay racfaankayga?

Haddii aadan doonaynin xukunka sheegashooyinka yaryar lagu khasbay adigoo racfaan ka qaadanaya, ka codso maxakamadda inay joojiso dayn qaadidda.[14] Ka dib marka aad qaadid dhamaan tilaabooyinka si loo keeno racfaanka maxakamadda sare, samee "mooshin" waydiinaya maxkamadda "baajin" – ama joojin – dhamaan tilaabada dheeriga ah ee maxkamadda dagmada ee la xidhiidha kiiskaaga. Waydii qareenka si uu u sameeyo tan.

DD. Waan guulaystay. Eedaysanuhu wuu racfaan qaadanayaa. Wuxuu isku dayayaa inuu iga joojiyo dayn qaadidda ayadoo racfaanku meel fiican marayo. Maxaan samayn?

Haddii aad isku dayayso inaad ka qaadato eedaysanaha, waxay/wuxuu ka racfaan qaadan karaa oo waydiin maxakamadda inayna ogolaan inaad qaadatid ayadoo racfaanku socdo. Eedaysanuhu waa inuu sameeyaa mooshin lagu baajinayo qaadashada. Waxaad ka muuqan kartaa maxkamadda waxaadna sheegi kartaa inaadan rabin qaadashada in la joojiyo muddada racfaanka. Ugu danbayntii haddii aad waydo racfaanka, waa inaad dib u bixisaa waxa aad horay uga qaadatay eedaysanaha.

[14] RCW 12.36.030

Qaybta 3:Haddii Qof Kugu Dacweeyo Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar

A. Sideen ku ogaan haddii qof i dacwaynayo?

Haddii qof kugu dacweeyo Maxkamadda sheegashooyinka Yaryar, waxaad heli doontaa foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar. Waxaad ku heli kartaa foomkan boosto ama shakhsi ahaan gurigaaga ama ganacsiga. Waxaa laguu qori doonaa “eedaysane.” Waxaad heli doontaa magaca qofka ku dacwaynaya sida “dacwoodaha.” Qofka ku dacwaynaya waa inuu kuu soo diraa foomkan Ogaysiiska Dacwadda Yar.

B. Waxaan helay Ogaysiis ah foomka Dacwadda Yar. Maxaan samayn?

The Ogaysiiska Dacwadda Yar wuxuu sheegi doonaa wakhtiga maxkamadaynta. Haddii aadan xallin ka hor maxkamadaynta ood heshid qofka ku dacwaynaya in la diido kiiskaaga, WAA INAAD TUSTAA MAXAKAMADAYNTA. Haddii aadan samayn, waxaad u waayi doontaa si iskaa ah, qofka/shirkadda ku dacwaynaysana (waxaa la dhahaa dacwoode) wuxuu isku dayi doonaa inuu kaa qaato. Waxay xukumi karaan mushahaaraadkaaga. Waxay qabsan karaan qaar hantidaada ah. Kharashka qaadidda la galay muddadii qaadidda, ooy ku jiraan kharashka qareen, hadaba waxaa lagu dari xukunka.

C. Ma inaan la xidhiidhaa dacwoodaha?

Haa. Fiiri haddii aad xallin karto – la gal heshiis banaanka maxakamadda. Isku day waydiinta dacwoodaha wada hadal. U sheeg inaad jeclaan lahayd inaad ku xalisaan dhibaatada ayadoo maxkamad la tagin.

Dacwooduhu wuxuu ogolaan karaa inaad adeegsato qof inuu noqdo “dhexdhexaadiye,” qaybta dhexdhexaadka ah taasoo caawisa inaad ku xalisaan dibadda maxkamadda. Xarumaha dhaxdhexaadinta isqabsiga ee heer deegaan badanaa ayaa leh dhexdhexaadiyayaal lacag la’aan ah. Xafiiska Guud ee Qareenka Gobalka Washington ama Xafiiskaaga ganacsiga Wanaagsan ee heer deegaan ayaa awoodi kara inuu dhexdhexaadiy.

Haddii aad ka heshid **warqad dalbasho** qof kaasoo ku dacwaynaya, dacwooduhu wuxuu isku dayaa inuu kula galo heshiis dibadda maxkamadda. Warqadda dalbashada waxay sheegtaa:

- aragtida dacwoodaha ee dhibaatada iyo
- waxa ay/uu filayo inaad ka qabanaysid.

Warqadda dalabashada waxay ku waydiin doontaa inaad kaga jawaabto qoraal.

D. Ka waran haddii dacwoodaha iyo ani galno heshiis ka hor maxkamad aadidda?

Wada diyaariya heshiis qoraal. Labadiinaba waa inaad saxiixdaan. Ka dib dacwooduhu waa inuu u sheegaa xafiis-hayaha maxakamadda inuu diido kiiska kadhanka kugu ah. Hubi laftirkaagu in la xaqiijiyo xafiis-hayaha inuu diiday kiiska.

Haddii aad ogolaatid inaad bixiso mar kale, dacwooduhu wuxuu waydiin doonaa xafiis-hayaha "Sii-wadasho" (dib dhig). Ka dib dacwooduhu waa inuu kuugu keenaa shakhsi ahaan ama boosto Ogaysiiska Sii-wadashada. Ogaysiiska Sii-wadashada wuxuu muujin doonaa wakhtiga maxkamadaynta cusub. Haddii aad bixiso ka hor tariikda maxkamadaynta cusub, dacwooduhu waa inuu u sheego xafiis-hayaha inuu diido kiiska. Hubi xafiis-hayaha inuu xaqiijiya dhacdadaan.

E. Ka waran haddii aan helo foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar maalmo ka hor maxkamadaynta?

Haddii aad heshid foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar ka yar toban cisho ka hor wakhtiga maxkamadaynta, la xidhiidh xafiis-hayaha maxkamadda dagmada. Garsooruhu waa inuu la dib dhacaa maxkamadaynta ugu yaraan toban cisho.

F. Ka waran haddii aan aaminsanahay dacwooduhu xaqiiqdii inuu yahay midka sameeyay waxyaabo khalad ah?

Haddii aad aminsantahay in dacwoodaha wax kaa khalday ama ku guul daraystay inuu raaco qayb ka mid ah heshiis, waxaad keeni kartaa "Kadaba Sheegasho" kadhan ku ah qofkaas. Haddii aad filaysid in dacwoodaha inaad lacag ku leedahay, keen Kadaba Sheegasho, sheegaysa in dacwoodaha lagu leeyahay xogaa lacag ah.

U gee Kadaba Sheegasho xafiis-hayaha maxkamadda sida ugu dhakhso badan ka dib marka aad heshid foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar ee dacwoodaha. **Ha sugin ilaa maxkamadaynta in loo sheego karsooraha waxa aad ka aaminsantahay dacwoodaha inuu sameeyay khalad.** Haddii aad sugaysid ilaa maxkamadayntu in loo sheego garsooraha, garsooraha wuxuu dareemi karaa in dacwoodaha uuna haysan ogaysiis ku filan oo ah Kadaba Sheegasho – aan waxba ka ogayn ka hor maxakamadaynta. Garsooruhu ma dhagaysan karo doodiina.

G. Sideen u keenaa Kadaba Sheegashada?

1. Aad maxakamadda ku qoran xagga sare ee foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar sida ugu dhakhso badan ka dib markaad heshid Ogaysiiska.
2. U sheeg xafiis-hayaha maxkamadda in aad doonaysid inaad keento Kadaba Sheegasho. Foomka tan lagu qabanayo wuxuu la mid noqon doonaa foomka Ogaysiiska Dacwadda Yar ee dawcooduhu adeegsaday in u ku bilaabo kiiska.
3. Ku sharax foomka waxa aad u filaysid dacwooduhu inuu khalday ama sababta aad aaminsantahay in aan lacag ayna/uuna kugu lahayn. Haddii aad aaminsantahay in qofku kugu leeyahay lacag, sharaxaad ka bixi.

4. **Samee ugu yaraan la koobi oo ah foomka Kadaba Sheegashada.** Sii orjinaalka xafiis-hayaha ee maxkamadda meesha dacwooduhu geeyay kiiska kadhanka kugu ah. Xafiis-hayuhu sidoo kale wuxuu ku siin karaa koobiyo dheeri ah oo foomka ah.
5. **Waxaad bixin doontaa lacagta keenista maxkamadda maadama ood ka bilaabaysay kiiska laftirkaagu.**
6. **Hubi** in dacwooduhu helo koobiga foomka Kadaba Sheegashada. U dir koobiga foomka Kadaba Sheegashada dacwoodaha, ama ha loo geeyo foomka asaga/ayada shakhsi ahaan. Fiiri qaybta xigta, la dhaho "Sideen ugu diraa ama ugu geeyaa koobiga foomka Kadaba Sheegashada dacwoodaha?"

H. Sideen ugu diraa ama ugu geeyaa koobi ah Kadaba Sheegashada dacwoodaha?

Isku day inaad u sheegto Kadaba Sheegashadaada dacwoodaha ugu yaraan **toban cisho** ka hor wakhtiga maxkamadda. Haddii aad u soo dirayso foomka Kadaba Sheegashada dacwoodaha, isku day inaad sidaas samayso ugu yaraan **13 cisho** ka hor wakhtiga maxkamadda si loo hubiyo in ay ku timaado wakhtiga. **Waxaad kartaa** Kadaba Sheegashada inaad ku gaysid shakhsi ahaan. **Ma gayn kartid laftirkaagu Kadaba Sheegashada. Waxaad kartaa:**

U qaadid xafiiska shariifka oo mid ka mid ah shaqaalaha jooga geeyo AMA

- aad qabsatid khabiir "waraaqo geeye" (waxay ku yaalaan diiwaanka shirkadaha) AMA
- waydii saaxiib kaasoo ka wayn da'da 18 inuu geeyo.

> ◈ Haddii aad haysatid saaxiib geeya, saaxiibku waa inuuna shakhsi ahaan ku lug lahayn kiiska si naba.

- Qofka geeya Kadaba Sheegashada waa inuu helaa saxiixa dacwoodaha foomka Adeegga caddaynta marka waraaqaha la gaynayo. Qof wayn oo la nool dacwoodaha (xaas/ninka, guri la dagan, iyo wixii la mid ah) ayaa sidoo kale saxiixi kara foomka caddaynta Adeegga. Waxaad koobi ka samayn kartaa foomka madhan ee Adeegga caddaynta qoraalkan ee ujeedadan.
- La imaw foomka Adeegga caddaynta oo saxiixan maxkmadda.

I. Sideen diyaar ugu noqon maxkamadaynta?

1. **Aruuri cadaymaha.**
   - Hel waraaqaha iyo dukumiintiyada muhiimka ah si aad u difaacdid naftaada ee kiiska. Keen wax kasta oo muujinaya sababta aan lagugu lahayn waxa dacwooduhu sheegayo. Tusaalayaal: heshiis, sawir, shaxan, sawir gacmeed, heshiiska kireystaha ama ijaar, jeegga la qaadicay, biilasha dayactirka, ama qoraal qiyaasta khasaare.

- Keen orjinaalada haddii ay suurto gal tahay. Keen koobiyo dheeri ah lacala haddii maxkamaddu doonto inay haysato wax kasta ood haysatid.
- **Waxaad kali ah ood cadayn soo gudbin kartaa muddada maxkamadaynta, ma ahan dib.** Haddii aadan hubin in aad u baahan doonto wax cadayn ahaan, keen si kastaba.

2. **La xdihdiidh makhraatiyaal gacan ka gaysan kara kiiskaaga.** Ka codso inay imaadaan maxkamadayntaada. (Washington dhexdeeda ma dalban kartid ("wicidda maxkamadda") makhraati inuu imaado maxkamadda sheegashooyinka yaryar.) Makhraatiyadaada waa inay aqoon u leeyihiin xaqiiqada ay ka marag kici doonaan. Makhraatiyadaadu waa inay arkeen ama maqleen wax-yeelada, shilka, ama isqabsiga shakhsi ahaan. Makhraatiyo badan ood heshid, way fiicantahay.
3. **Daalacasho.** Haddii aad doonaysid inaad aragto sida maxkamadda sheegashooyinka yaryar u shaqayso ka hor maxkamadayntaada, waydii xafiis-hayaha maxkamadda marka ay maxkamaddu dhagaysanayso maxkamadaynta sheegashooyinka yaryar. Ka qayb gal maxkamadaynta. Ka hel fikrado waxa aad ka heli lahayd iyo sida garsooruhu u xukumayo. Haddii maxkamaddada leedahay muuqaal daawasho oo ku saabsan maxkamadda sheegashooyinka yaryar, ka codso xafiis-hayaha muuqaalka daawasho.
4. **Tababar maxaad rabtaa inaad dhahdo.** Soo bandhigidaada waa in la maamulay oo la soo koobay. Isku day inaad qortid liiska qodobada muhiimka ah eed doonaysid inaad xasuusnaato. Ooy ku jiraan su'aalaha dacwoodaha iyo makhraatiyadaada. Horay ha ogaadaan makhraatiyadaadu su'aalaha aad rabtid inaad waydiiso.

J. Ma inaan cadeeyaa inaan waxba galabsan?

Nidaamka maxkamadda Ameerika, qofku waa danbi laawe ilaa lagu cadeeyo inuu danbiile yahay. Qofka ku dacwaynaya waa inuu cadeeyaa in uu lacag kugu leeyahay/leedahay. Waa inaad iska difaacdaa caddaynta dacwoodaha iyo makhraatiyada.

K. Ka waran haddii aanan samayn karin wakhtigayga maxakamadaynta?

Haddii aadan ka muuqan maxkamadda, waxaad u waayi kartaa si iskaa ah ("maqnaansho").

Haddii aad ku guul daraysatid inaad imaato oo aad u waydo si iskaa ah, waxaa suuro gal ah inaad heshid fursad labaad. **Waa inaad haysatid sabab wanaagsan** muuqasho la'aanta wakhtiga maxkamadaynta. Keen Mooshin in la Qaadaco xukun sida ugu dhakhso badan ka dib xukunka maqnaansho. U keen mooshinkan xafiis-hayaha maxkamadda. Fiiri qoraalkanaga la dhaho *Mooshinka in la Qaadaco Xukun/Amarr,* laga heli karo www.washingtonlawhelp.org.

Waxaad u baahnaan kartaa caawin qareen mooshinkan.

L. Maxay tahay inaan keeno maxkamadaynta?

- Dhamaan caddayntaada, ooy ku jiraan dukumiintiyo qoraal ah iyo caddaynta muuqaalka
- Makhraatiyadaada
- Foomka Adeegga caddaynta oo saxiixan (haddii aad keentay Kadaba Sheegasho)

M. Maxaan sameeyaa marka aan u tago maxkamadaynta?

Iska xaadiri xafiis-hayaha maxkamadda markaad u timaado maxkamadda maxkamadayntaada. Xafiis-hayuhu wuxuu kuu sheegi doonaa qolka maxkamadda aad tagaysid. Waxaad ka heli kartaa liiska kiisaska maxkamaddu dhagaysan doonto maalintaas lagu dhajiyay dibadda qolka dhagaysiga maxkamadda. Waxaad dhagaysan kartaa liiska kor loo yeedhinayo bilawga kulanka. Haddii aadan arag liiska kiisaska ama aadan ka maqal yeedhinta, la kulan xafiis-hayaha maxkamadda.

N. Maxaa dhacaya maxkamadaynta?

Garsooruhu wuxuu xusi doonaa qofka kaasoo ku dacweeyay sida “dacwoodaha.” Garsooruhu wuxuu kuu xusi doonaa “eedaysane” (waxaad ka “difaacaysaa” naftaada qofka kaa soo hor jeeda).

Garsooruhu sida caadiga ah wuxuu bilaabi asagoo sharaxaya nidaamka maxkamadda. Badanaa wakhtigan, dhamaan dacwoodayaasha, eedaysanayaasha iyo makhraatiyada waa inay ku dhaartaan inay runta sheegayaan. Ka dib maxkamaddu waxay u wici kiiska koobaad. Sug garsooraha inuu ku dhawaaqo kiiskaaga. Ka dib soo dhig cadaymahaaga iyo makhraatiyadaada.

O. Maxaa dhacaya marka kiiskayga la waco?

Dacwooduhu wuxuu heli doonaa fursad inuu hadlo marka hore. **Ha dhabqin!** Ka dib garsooruhu wuxuu waydiin karaa dacwoodaha ama makhraatigiisa/keeda su’aalo. Ka dib garsooruhu wuxuu ku siin karaa fursad inaad waydiisid dacwoodaha iyo makhraatiyadiisa/deeda su’aalo sidoo kale.

Ka dib waxaad heli doontaa toogadaada inaad hadashid.

P. Maxaan dhahayaa marka ay tahay toogadayda inaan hadlo?

- Sharax waxa dhacay sida wax kuula muuqdaan.
- Tus garsooraha cadayn kasta ood la timid.
- Sharax sababta aad u aaminsantahay inuuna lacag kugu lahayn dacwooduhu ama sababta uu kuugu leeyahay wax ka yar inta uu sheegayo dacwooduhu.
- Haddii aad keentay Kadaba Sheegasho (sheegaysa dacwooduhu inuu wax khalday ama aad ku leedahay lacag), sharax hadda.

- Haddii aad haysatid makhraatiyaal, u sheeg garsooraha inaad jeclaan lahayd inay makhraatiyadaadu ka marag kacaan. Marka garsooruhu dhaho waad su'aali kartaa makhraatiyadaada, waydii su'aalaha aad ka diyaarisay waxa ay arkeen ama maqleen. Waydii su'aalaha muujinaya inaad saxantahay.

Q. Garsooruhu ma shaacin doonaa go'aanka?

Ka dib dhagaysiga labada dhinacba, garsooruhu wuxuu ku dhawaaqi karaa go'aanka si dhakhso leh. Mararka qaar garsooruhu wuxuu u baahanyahay wakhti dheeri ah inuu baadho kiisak. Haddii ay saas tahay, garsooruhu wuxuu ku dhawaaqi doonaa go'aanka oo qoraal ah dhawr asbuuc gudahood. Haddii garsooruhu ku go'aansado maxkamadda maalinta maxkamadaynta, oo labada dhinacba joogaan maxkamadda, adiga ama dacwoodaha wuxuu waydiin karaa maxkamadda in la diyaariyo qorshe lacag bixin.

R. Waan guuldaraystay. Hadda maxaa?

Waxaad siin kartaa lacagta dacwoodaha hal mar ama waxaad ogolaan qorshe lacag bixin. Marka aad si buuxda u bixisid, dacwooduhu waa inuu ogaysiiyo maxkamadda dagmada in aad bixisay. Hubi si loo xaqiijiyo dacwooduhu in uu kiiska tuuray.

Haddii aadan awoodin inaad bixiso oodan lahayn hanti badan ama lacag badan, waxaad keeni kartaa "Dacwadda Wax-dhaafidda" si looga hortago xoogaa yar oo qiimaha lahaansho. Waxaad awoodi kartaa inaad difaacdo gurigaaga, saamaan, gaadhi, dhar iyo mushahaaro dhawr ah. Qoraalkanaga, *Xuquuqda Dayn Qaataha ee Dacwadda* iyo *Sida loo Dalabado Waxdhaafidda Hantida Shakhsi*, oo laga heli karo www.washingtonlawhelp.org, waxaa ku qoran xog dheeri ah.

Haddii aad awooddo inaad bixiso balse aadan ku bixin 30 cisho gudahood ee xukunka (ama marka loo eego qorshaha lacag bixinta ay samaysay maxkamaddu), dacwooduhu wuxuu isku dayi karaa inuu qaato:

- Waxaad aadi kartaa maxkamadda mar kale waxaadna ka jawaabi su'aalaha ku saabsan cadadka iyo goobta mushahaaraadkaaga, akoonti bangiga, hantida shakhsi iyo hantida ma guurtada ah.
- Dacwooduhu wuxuu keeni karaa waraaqaha inuu qaato mushahaaraadkaaga ama akoonti bangigaaga "la ganaaxay" - la siiyay dacwoodaha meesha adiga lagaa siin lahaa.
- Dacwooduhu wuxuu keeni karaa waraaqaha inuu qabsado qaar hantidaada ah oo uu iibiyo si loogu bixiyo wixii lagugu lahaa (waxaa loo yaqaan "dhaqan galin").
- Dacwooduhu wuxuu dhigi karaa "guri haysashada" ee hantidaada maguurtada ah. Guri haysashadu waxay samaysaa iibinta hantidaada maguurtada ah. Guri haysashadu waxay ahaan hantida xataa ka dib markaad iibiso.
- Haddii dacwoodaha dacwadiisu ka kacday shil gaadhi oodan caymis ku jirin, dacwooduhu wuxuu joojin karaa laysinkaaga darawalnimada.

S. Waan guuldaraystay. Racfaan ma qaadan karaa?

Haddii aad ku guuldaraysato dacwadda dacwoodaha kadhanka kugu ah, waxaad racfaan qaadan kartaa **haddii dacwaddaasu ahayd $250 ama ka badan.**

Haddii aad keentid Kadaba Sheegasho kadhan ku ah dacwoodaha ood ku guul daraysatid, waxaad racfaan ka qaadan kartaa **kali ah haddii Kadaba Sheegashadaadu ahayd $1,000 ama ka badan**.[15]

Haddii aad go'aansato inaad racfaan qaadato, maxkamadda sare waxay tix galin doontaa racfaankaaga. Maxkamadda sare waxay fiirin doontaa diiwaanka iyo caddaynta ee maxamadayntii hore ee maxkamadda sheegashooyinka yaryar.[16] Ma jiri doonaan gudi, qareenno, wax sheegid cusub, marag cusub ama cadayn cusub.

Haddii aad doonaysid inaad racfaan qaadato, qaad tilaabooyinkan **30 cisho gudahood** ee xukunka garsooraha ee maxkamadda sheegashooyinka yaryar:[17]

1. Ka hel foomka Ogaysiiska Racfaanka xafiis-hayaha maxkamadda dagmada. Buuxi. Keen orjinaalka Ogaysiiska racfaanka maxkamadda dagmada.
2. Ogaysii dacwoodaha in aad racfaan qaadanaysid. Ha haysto koobiga Ogaysiiska Racfaanka loo geeyo (ama "la siiyo") dacwoodaha. Ka dib keen Adeegga caddaynta (ama warqadda dhaarta) AMA Dirid Shaabadaysan ama Diwaan Jawaab Celinta boosto 30 cisho gudahood. (si loo ogaysiiyo dacwoodaha racfaanka, raac tilaabooyinka aad qaaday kuwo lamid ah, haddii aad gaysay Kabada Sheegasho. Fiiri xagga sare: **Sideen ugu diraa ama ugu geeyaa koobi ah Kadaba Sheegashada dacwoodaha?)**
3. Ku bixi maxkamadda dagmada lacagta yar ee warqadda ee xukunka maxkamadda sheegashooyinka yaryar (badanaa waa ilaa $20).[18]
4. Ku dhaji caddaynta dayn bixinta maxkamadda dagmada. caddaynta dayn bixinta waa inay goob jog ka ahaadaan labo ama dad ka badan (qof hubiya in lacagta la bixin doono), ama shirkad wax hubisa (haddii maxkamaddu ogolaato), labo jeer cadadka xukunka lagu daray kharashka ama labo jeer cadadka dacwaddaada (wax kasta oo kabadan).[19] caddayntan dayn bixinta waxay bixisaa xukun kasta kadhan kugu ah haddii aad waydo racfaankaaga.[20]
5. Bixi lacagta gaynta ee maxkamadda sare cadaan, warqadda lacagtu ku qorantahay, jeegga lacag-hayaha, lagu bixinayo xafiis-hayaha maxkamadda sare (badanaa waa $200). Waxaad awoodaa in lagaa dhaafo lacagtan keenista (waydii in ay tahay inaadan bixin) haddii aad dhaqaalo yartahay. Waxaa sidoo kale jiri kara lacagta geedi

15 RCW 12.40.120
16 RCW 12.36.055
17 RCW 12.36.020
18 RCW 3.62.060
19 RCW 12.36.020(2)
20 RCW 12.36.090

socodka diyaarinta oo dheeri ah. 14 cisho gudahood ee keenidda Ogaysiiska Racfaanka, xafiis-hayaha maxkamadda dagmada wuxuu keeni doonaa warqadda maxakmadda sare, taasoo siin doonta lambar cusub kiiskaaga.[21] Marka xafiis-hayaha maxkamadda dagmada kuu sheego lambarka cusub ee kiiska, la xidhiidh maxkamadda sare tilmaamo dheeri ah.

T. Waan racfaan qaadanayaa. Ma ka joojin karaa dacwoodaha isku dayidda inuu wax qaato anigoo racfaan qaadanaya?

Haddii aadan doonaynin xukunka sheegashooyinka yaryar lagu khasbayo muddada racfaankaaga, ka codso maxkamadda in "la baajiyo" ama la joojiyo qaadashada.[22] Ka dib marka aad keentid racfaanka maxkamadda sare, samee mooshin maxkamadda sare laga codsanayo in maxkamaddu "baajiso" dhamaan sheegashooyinka ka socda maxkamadda dagmada ee xukunka. Qareen ayaa kuu sheegi kara sida loo sameeyo tan.

Haddii aad ka codsatid maxkamadda sare in "la baajiyo" qaadashada, dacwooduhu wuxuu ka muuqan karaa maxkamadda wuxuuna ka doodi baajinta. Maxkamaddu waxay ka ogolaan kartaa dacwoodaha waxayna sii wadi qaadashada. Haddii aad ku guulaysatid racfaankaaga, dacwooduhu wuxuu dib kuu siin karaa lacagta.

U. Maan heli karaa kaalmo sharci oo dheeri ah?

- Haddii aad dhaqaalo yartahay, waxaad ka heli kartaa talo sharci Isku-xidhidda Waxbarashada Sharci iyo Gudbinta (CLEAR) laynka 1-888-201-1014. Qof jooga ayaa sidoo kale wxuu kuu sheegi karaa haddii ay jirto adeegyo sharci oo lacag la'aan ah dagmadaada. Haddii aad ku nooshahay dagmada King, wac 211.
- Mashruuca cadaaladda Waqooyi-galbeed (Northwest Justice Project) wuxuu leeyahay xog qoraal oo kale taasoo ku caawin karta. Waxaa jira qoraalo ku saabsan sharciga Mulkiilha-kireyste, musalafid, furniinka, khilaaf qoys, rabitaano, iyo wax badan. booqo www.washingtonlawhelp.org.
- Waxaad ka heli kartaa xog qoraal ah Ururka Qareennada Gobalka Washington (Washington State Bar Association) (206-727-8213) ama Xafiiska Guud ee Qareenka Gobalka Washington (Washington State Attorney General's Office) (lam. Lacag la'aanta 1-800-551-4636).
- Haddii aad filaysid inaad u bahantahay qareen oo xafiiska adeegyada sharci ee deegaankaaga uuna ku caawin karin, waxaad awoodi kartaa inaad heshid qareen kaasoo kugu dalici doona qiimo yar ballantaada koobaad. Ka baadh diiwaanka shirkadaha ee diiwaanka taleefoonkaaga ee ***"Qareennada."*** Waxaa sidoo kale ku qornaan kara barnaamijyo gudbin ooy hagaan ururka qareennada deegaankaaga.

[21] RCW 12.36.050(1)

[22] RCW 12.36.030

Muunadda Warqad Dalbasho

Jill Landlord

69 Main St.

Tacoma, WA 98425

Mudane. Landlord:

Waxaa ka soo wareegay hadda labo asbuuc ilaa markii aan ka guuray guryahaaga kirada ah ee ku yaala 38 Sycamore, Elbe, WA 99302. Waxaan ku siiyay ogaysiis qoraal ah markay ahayd Mey 31, 2012. Waxaan ka baxay guryaha dhamaadkii maalinta, Mey 31.

Markii aan ku soo guuray guryhaaga waxaan ku siiyay lacagta deebaajiga oo ah $500. Ayadoo la raacayo Qodabka Kiraystaha Mulkiilaha Xaafadda (Residential Landlord Tenant Act), waa inaad ii soo celisid deebaajigayga si buuxda ama isiisid sharaxaad qoraal ah sababta loo haysto 14 cisho gudahood ee ka bixitaankayga. RCW 59.18.280. Sidoo kale sharcigu wuxuu qorayaa in aad masuul ka tahay labo jeer cadadka deebaajiga lagu daray kharashka maxkamadda iyo kharashka qareenka ee fulin la'aanta shuruudaha deebaajiga sare.

Wada hadalkeenii taleefoonka maanta ka hor, waxaad sheegatay inaadan bixinaynin deebaajigayga burbur soo gaadhay guriga dartiis. Burburka aad sheegatay waa xoqmid iyo dheeh ka kaca caadiga ah, taasood aadan u haysan karin ee Qodabka Kiraystaha Mulkiilaha Xaafadda (RLTA). Waxaan haystaa sawirada guriga siduu ahaa markii aan ka guuray, oo makhraati leh kaasoo ka marag kici doona in gurigu ahaa nadiif markii aan ka guuray sidii uu ahaa markii aan soo dagay oo kale.

Waxaan sidoo kale haystaa koobiga qoraalada taxan een labadeenuba saxiixnay markii aan soo dagay. Wuxuu muujinayaa in xaaladda ugu badan aad ka cabanaysid ay jireen markii aan soo dagay.

Fadlan ii soo dir jeeg ama warqadda lacagta ku qorantahay ee $500 ee Juulay 1, 2012. Haddii aanan helin deebaajigayga taariikhdaas, waxaan gayni doonaa kiis kadhan kugu ah ee maxkamadda sheegashooyinka yaryar ee dhamaan cadadka lacagta lagu qoray Qodabka Kiraystaha Mulkiilaha Xaafadda (Residential Landlord Tenant Act).

Daacadnimo,

Joe Tenant

1234 Main Street, #B

Tacoma, WA 98425

MAXKAMADDA DAGMADA EE GOBALKA WASHINGTON
EE DAGMADA _____

_____ _____ **Dacwoodaha(yaasha),** **Ka soo hor jeeda.** _____ _____ **Eedaysanaha(yaasha).**	**LAM. DACWADDA YAR. _____** **ADEEGGA caddaynta** **[Waxaa buuxiyay qofka kaasoo gacanta ku hayay Ogaysiiska Dacwadda Yar ee Eedaysanaha(yaasha)].**

WAXAAN CADAYNAYAA:

1. Inaan ka waynahay da'da 18 sano, qaybna kama ihi ficilkan.

2. Inaan u geeyay _____ [Magaca eedaysanaha] ee OGAYSIISKA DACWADDA YAR:

3. Adeegga waxaa loo sameeyay ayadoo la raacayo Sharciga xadidan ee Maxkamadda Madaniga ah (Limited Jurisdiction Court Civil Rule) 4(d)

SAX MID:

[ ] waxaa loo geeyay qofka ku xusan qormada 2 ee sare.
[ ] waxaa loo geeyay _____ [Magaca], qofka da'da haboon ee dagan jawaab celiyaha deegaankiisa caadiga ha.

/

/

Waxaan cadaynayaa xeer ciqaabeedka sharciga ee Gobalka Washington in waxa sare ay yihiin run iyo sax.

Lagu saxiixay _____, markay ahayd_____.
[Goobta] [Taariikhda]

_____
Saxiixa

_____
Daabac ama Qor Magaca

Buuxi qaybta hoose kali ah haddii kharash la siiyay qofka adeegga fulinaya.

Kharashka:
Adeegga_____
Qoraalka _____
Wadarta_____